

## Kobcinta isgaarsiinta iyo hadalka

Qaabab fudud oo lagu dhiirigalin karo barashada hadalka:

 Fariiso adigoo isla simaya dhereka canuga isla markana soo jiidanaya dareenkiisa ama dareenkeeda.

(Hor fariiso canuga isla markaana taabo wajigiisa ama wajigeeda).

- 2. La hadal canugaaga.
  - U sheeg ama usharax waxyaalaha laga helo deegaankiisa ama agagaarkiisa.
     Sida." Kubbad cas" (kor uqabo kubbadda)
     "Baabuurki Sawar" (kor uqabo baabuurka)
  - ii) U sheeg waxa markaasi dhacaya.Sida" Aabbe wuu karinayaa""Eey baa qaylinayaa ama ciyayaa"
  - iii) U sheeg waxa aad markaasi sameyneysid ama canuga uu sameeynayo. Sida"juus baan shubayaa" "waxaan beddelayaa daybarkii Sumaya"
- 3. Isticmaal hadalo ama kalmado fudud. Sida"gasho jaakadda"."gacanta geli"."kor u jiid siibka"
- 4. Wax badan soo celceli hadalada qaarkooda.Xooji dhihitaanka ereyada muhimka ah. Isticmaal ama dheh ereyo isku mid ah si aay u metelaan waxyaalo ama dhacdooyin. Sida."waa kani eey, eey weyn, eeyga wuxuu dhahaa wah wah"
- 5. Balbalaari tilmaamaha iyo dareenka aad ku muujisid wajiga. Sida." Yaa markaad dhaheysid (xiribaha kor u jiid afkaagana fur)markaad dhaheysid eey fiiri(farta u taag xagiisa)
- 6. Soo celceli ereyada iyo codadka canugaaga,kana daba dheh. Sida.canuga "ba" qofka weyn ama waalidka"ba" Canuga"wa wa " qofka weyn ama waalidka"wa wa"
- 7. Tusaalee una balbalaari isku dayidda canugaaga isku dayeyo ereyada inuu dhaho. Sida.canuga"baab"

qofka weyn" baabuur "(tusaale) qofka weyn" baabuur soconayo "(balballarin)

8. Iska ilaali su'aalo jawaabtooda tahay haa/maya sababtoo ah canuga wuxuu dhahayaa hal erey si uu u jawaabo.

Sida. qofka weyn "ma rabtaa caano kale?" canuga wuxuu dhahayaa si u jawaabo"haa" Canuga:"maxaad rabtaa " canuga si u jawaabo wuxuu dhahayaa "caano kale"

9 Haddii uusan canuga hadleyn ka garo oo ka faham dareenka uu muujinayo. U sheeg canugaaga ereyada uu isticmaali doono mustaqbalka.



Sida. Markey dooneyso inaad soo raacdid ooy gacanta ku jiido, dheh" kaalay?. Ma waxaad dooneysaa inaan ku soo raaco? Haye, waan ku soo raaci

Fiiro gaar ah: Xasuusnow, markaad dooneysid canugaga inuu isticmaalo ereyo ama tilmaamo.
Sida qofka weyn "Maxaad rabtaa" (hoos u tirso illa shan)
qofka weyn "Maxaad rabtaa" (hoos u tirso illa shan)
Haddii uu canuga ka jawaabin qofka weyn ha dhaho: "caano".

M.T.A.C.L: Hawlaha Caruurta intey yaryihiin